# CENTER FOR INCLUSIVE CHILD CARE

## Talooyin Kooban

Qeexitaanka Qaybaha Wax Barashada

Qorsheynta bey'adda caruurta yar yar ama kuwa socod baradka wuxuu ka dhacaa labo tilaabo:

1. **Qeexitaanka Qeybaha wax barashada**
2. Habeeynta goobaha wax barashada

Qeexitaanka goobaha waxbarashadu waxay u baahan tahay in la sameeyo qaab-dhismeedyada gudaha iyo dibedda ba. Marka la tixgelinayo qaabeynta bay'adda waa muhiim in la tixgeliyo sida booska loogu qaybin karo goobo wax barasho oo kusalaysan koritaanka caruurta oo qaybaha kala duwan uu cunugu ka koro ah, lana socda shaqsi kasta waxaa uu xiiseeyo iyo baahidiisa iyo in looqaabayo in ay caruurtu dareemaan bulshonimo.

### Daryeelka shaqsiga ee joogtadaa

dabadda ba) ay u taagerri karto wax qabadka goob kasta oo waxbarasho sida goobaha daryeelka shaqsiga, waxbarashada, ciyaarta iyo korinimada; iyo dadka waaweeyn iyo isdhexgalak bulshada.

### Tixgelin Muhiim ah

- Caruurta lagu hayo boosaska iska banaan ama sida liita loo qeexey  way iskadaba meer meereystaan, ama qofka hayya ayeey iska daba joogaan, ama waxaa ku adag in ay wax usoo jeestaan.
- Goobaha wax barashada oo sifiican loo qeexey waxay kobcinayaan wada shaqaynta iyo in uu cunugu carrigiisa mushaaxo ayadoo ay bay'addu ay tahay mid nadaamsan oo si joogta ah u qaabaysan.
- Dhallaanka iyo socod baradka waxay faaido kahelaan bay'ad miisaaman oo la odorosi karo oo wax soo saar leh.Iska ilaali in bedelitaanka qaabka bay'adda oo hadba labadalo oo sida lama filaankaa loo bedelo (tusaale ahaan: hadba oo alaabta lakala wareejiyo, ama meelaha caruurtu wax loo dhigo oo labedelo, iwm). Tani waxay jahwareer kuridi kartaa caruurta iyo xubnaha qoyska.

### Waxa kale oo muhiim ah in laga fekero sida qaabka guud ee bay'adda (gudaha iyo

- Goobta xafaayadaynta ama musqusha waa in ay: kafogyihiin goobaha cuntada lagu diyaariyo iyo goohaha wax lagu cuno loona kala bedelo waastooyinka ee hawl kasta.
- Waastooyinka caruurta dherar jeeda waxay u sahlayaan caruurta in ay si buuxda oo qayb qaataan daryeelka shaqsiga ee joogtadaa.
- Waasto cunuga dherar jeeda oo banaanka ku samaysan waxay sahlaysaa in uu cunugu faraha dhaqdo ayadoon A child-height sink outdoors enables handwashing ayada oo aan hakad gelin socodka hawasha iyo cariga ay mushaaxayaan.
- Goobaha nasashada/hurdada waa in ay siiyaan cuniga daganaan iyo nasasho.
- Goobaha nasashada/hurdada waa in lagu habeeyo meel aan qaylo lahayn oo ka fog meelaha ciyaaraha iyo socodka badan.
- Nal yar iyo meel aamusan waxay sahlaysaa ilmuhu in ay hurdo ladhacaan.
- *Dhallaanka iyo socod baradka hurda waa in mar kasta korka laga ilaaliyo.

## Waxbarashada, Koritaanka iyo Ciyaarta

In laga fogeeyo goobaha ciyaarta firfircoon goobaha ciyaarta dagan waxay fududeyneysaa in uu yaraado khilaafaadka. Sii caruurta hogaan qeexan, oo joogta ah, oo naxariis leh inta ay laqabsanayaan meel kasta iyo inta ay kabaranayaan wax kasta isticmaalkood. Ciyaarta wasaqda leh waa in lagu habeeyo goob si fudud lagu nadiifin karo (tasaale ahaan., dhul sibir ah oo aan roog ahayn una dhow biyo iyo waxa wax lagudhqo).

- Goob kasta oo wax barasho waa in ay.
- Tahay waasac kufilan caruurtu in ay kuwada ciyaarto ciriiri nah aysan dareemin.
- Goob kastana waa in uu qof weeyn waa in uu dhex joogi karo ama aaga kajoogi karo.
- Alaabaha aagga xadadaya (sida:, marfishyada gaagaaban iyo roogagga kooban) waxay kaa caawinayaan in ay qeexaan boosaska loogu talagalay dhallaanka iyo socod baradka.
- Alaabaha aagagga xadadaya waa in gaabanyihiin si loo arki karo cariga dhan.
- Alaabta in lagu qabto dhulka/darbiga waxay kacelinaysaa in ay soo dhacaan.
- Dhulka rooga saaran oo kor u kacsan wuxuu nadaamiyaa aagga, wuxuuna qeexaa goobaha wax barashada, caruurta nah dareen aragti buu siiyaa iyo wuxuu kobciyaa dhisitaanka jirka
- Kudar qayb banaan oo cunuga dareensiisa waasacnimo si uu cunugu waxa uu xiisaynayo uu uhelo.

## Isdhexgalka dadka waaweyn iyo bulshada

- Kuxooji isdhexgalka dadka waaweeyn iyo ishexgalka bulshada goobaha qaarkood (tusaale ahaan., meesha lagasoo galo/laga baxo, xiriirka waalidka, kulamada iyo isu keenida dadka) adoo tixgelinaya dadka waaweeyn dareenkooda iyo inaad u hawl fududeeysid.
- Kudhiira gali xubnaha qoysaska in ay kusoodhawaadaan adoo u dhigaya fadhiyo meesha lagasoo galo/lagabaxo iyo banaanka.
- Bay'adda u habee qaab kudhiragalinaysa xubnaha qoysaska iyo macalimiinta in uu dhex maro isweeydaarsi.
- Ku dar goob macalimiintu ay ku qoorshaysan karaan, kunadiwaan gashan karaan kuna kulakulmi karaan waalidiinta ama shaqaalaha kale.

Ka dib markaad goobaha u habeeysid wax barasho iyo daryeelka shaqsiyeedka ah oo joogtadaa, dib u noqo oo bay'adda guud inta fiirisid is weeydii su'aalahaan:

- Goobaha mawada shaqeeyaan marka loo eego hawsha socota iyo shaqada ay qabanayaan?
- Goobuhu mawada shaqeeyaan ayagoo bixinaya jawi diiran oo soo dhawayn leh?
- Miyuu jiraa misaaniyad lagu wax odorosi karo ama wax lagu dhisi karo?
- Bay'addu matahay mid kusalaysan baahida iyo danaha caruurta?
- Bey'addu miyeey ka tarjumaysaa aragtida kala duwan iyo sidoo kale khibradaha guriga ee carruurta?

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo [www.inclusivechildcare.org](http://www.inclusivechildcare.org).

Copyright © 2020 Center for Inclusive Child Care

Qalabkan waxaa si tartiib tartiib ah loogu soo saari karaa ujeeddooyin waxbarasho. Macluumaadka ku yaal xaashidan tilmaamaha ah waxaa laga beddelay ilo badan.

Dhaqaale ay bixiso Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.